Xogta Mashruuca Kaydka Jawiga qoyan ee Rainier Valley.

Waa maxay biyaha qashink ahi?

Biyaha qashinka ah waa wax kastoo ka taga meesha wax lagu dhaqo, tuushka, baatka la dhexgalo ama musqusha. Dhamaan qashinkaasi waxa uu ku dambeeyaa hal ililad biyo aad u wasakh ahoo loogu yeedho biyaha qashinka ah.

Taabashada biyaha qashinka ahi waynu ku bukoon karnaa. Ka fogaanta dadka ee biyaha qashinka caafimaad keenay ilaalisaa. Biyaha qashinka ahi waxay siddoo kale waxyeeleeyaan gacan biyoodka Puget harooyinka iyo webiyada haddii aan la nadiifin.

Waa maxay biyaha roobku?

Biyaha roobku waa kuwa orda wadooyinka, marinada gaarka ah, saqafyada guryaha iyo goobaha kale ee dibada marka roobka wayni da'ayo. Saliidda gawaadhida, gaasta, saalladda xayawaanka, bacrimiyaha dhirta, suntan cayayaanka, qashinka iyo kimikadda kale dhamaan waxay ku hadhaan dibada. Dhamaantoodna waxay ku dambeeyan biyaha roobka gudahooda.

Taabashada biyaha roobka waynu ku bukoon karnaa. Muddo Wakhti ah biyaha roobku waxa ay waxyeeleeyaan gacan biyoodka, webiyada iyo harooyinka haddii aan la nadiifin.

Magaalooyinka cusub,biyaha roobku waxay ku dhacaan tuunbo dhulka hoostiisa taas oomarta dhexda biraha daboolka u ah wadadda dhinaceeda. Beebku waxa uu u qaadaa biyaha roobka wershad loo qaado biyaha qashinka ah isla markaana si badbaado leh baa loo nadiifin karaa. Magaalooyinka hore u jiray sidda Seattle, beebka biyaha roobku waxaa uu la mid yahay ka loo adeegsado in uu u qaado biyaha wasakhda ah ilaa warshada.

Muxuu King County sameeyaa si uu u nadiifiyo biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka?

Biyaha qashinka ah ee ku jira beebabkani waxa ay ku dhacaan beebka wayn oo ay leedahay King County. Beebka degmaddu waxaa uu u qaadaa biyaha qashinka ah meel lagu warshadeeyo halkaas oo si badbaado leh loogu nadiifiyo oo loogu diro meel gacan ah. Meesha la yidhaado Rainier Valley, biyaha roobku waxa ay maraan meel la mid ah halka biyaha qashinka ahi ay maraan si ay u gaadhaan warshada.

King county waxay maamushaa warshada nadiifisa biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka. Inta hadha waxaa loo diraa gacanka Puget sound(ama webiga Tolt ee udhow Carnation). Waxa jira lix warshadood oo u dhow King County kuwaas oo nadiifiya biyaha qashinka ah iyo kuwa roobka. Biyaha qashinka ee Rainier Valley iyo biyaha roobku waxay tagaan warshad ku taal Magnolia iyagoo sii maraya beebab hoos mara Beacon Hill, ee dhinac mara webiga Duwamish iyo xeeliga Seattle. King County

Maxay King County dhisaysaa?

King County waxay dhisaysaa beeb cusub iyo taangi biyaha lagu kaydiyo si ay uga fogayso Webiga Duwamish biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka.

Siddee beebka cusubi uga fogayn doonaa Webiga Duwamish biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka ee wasakhoobay ?

Inta ay da'ayaan roobabka xooga lihi, Biyo aad u badan baa ku dhaca beebabka qaada biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka ka yimaada Rainier Valley kuna socda warshada King County. Beebabku way buuxsamaan, tana waxay sababtaa in biyaha qashinka ah iyo biyaha roobku ay ka soo fatahaan Beebka Degmadda kuna fatahaan Webiga Duwashim.

Mid ka midda beebabka Degmadda ugu wayn ee mara Rainier Valley waxa uu hoos maraa wadadda Rainier Ave.S. iyo wadadda Martin Luther King Way S. beebka cusubi wuxuu isku xidhi doonaa beebkan wayn ee hoos mara Rainier Ave. S. ku kale oo beebka degmadda ah oo hoos mara S. Bayview St. isku xidhida labada beeb waxay ka saari doonaan biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka beebka buuxa ee hoos mara Rainier Ave. S.

Siddee buu taangiga cusubi uga ilaalin doonaa Webiga Duwamish biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka ee wasakhoobay ?

Isla beebka Degmadda hoos mara Rainier Ave. S., ayaa hoos mara wadadda Martin Luther King Way S. marka ay ku sii dhawaanayso Columbia City. Waxay isku xidhmaan beebka hoos mara S. Hanfors St. taas oo aad u buuxsanta marka roobabka waa wayni da'ayaan. Marka beebka S. Hanford St. uu aad u buuxsamo, waxay ku sii daysaa Webiga Duwashim biyaha qashinka ah iyo biyaha roobka ee wisikhoobay. Fatahaadan waxaa loogu yeedhaa "Fataha Bulaacadaha isku Xidhan" ama CSOs.

Taangiga waxaa ku ururaaya biyaha dheeraadka ah oo wisikh ah iyo biyaha roobka ka hor inta aanay ku fatihin Webiga Duwamish. Marka roobka wayni joogsado, biyahii qashinka ahaa iyo biyahii roobku ee ku jiray taangiga waxay dib ugu noqon doonaan beebka hoos mara S. Hanford St. waxaana lagu nadiifiyaa warshadda ku taal Magnolia.

Maxay King County ay u doonaysa in ay u dhisto beebka iyo taangiga?

Ka fogaynta Webiga Duwamish biyaha wisikhoobay iyo kuwa roobku waxay inaga caawisaa in aynu caafimaad ku joogno oo webiguna nadiif sii ahaado.

Sharciga gobolku waxa uu u baahanyahay in fataha beebka hoos mara S.Hanford St. uu dhaco hal mar oo keliya sanadkii. Wakaalada Ilaalinta Deegaanka ee Maraykana waxay uga baahantahay King County in ay xadido fataha CSO mid sanadkiiba marka la gaadho 2030. Xubnaha bulshadda ah ee ku ag nool Webiga Duwashim waxay dalbadeen in CSO webiga Duwamish ugu horaynta la nadiifiyo. King County waxay shaqo ka bilaabaysaa hadda CSOda Webiga Duwashim sidda ay bulshaddu codsatay.

Siddee bay ku go'aansatay King County qalabka ay u adeegsanayso in ay kaga ilaaliso webiga Duwamish biyaha wisikhda ah iyo biyaha roobka ee wisikhoobay?

Qalabyo fara badan baa la isticmaali karaa si looga ilaaliyo webiga biyaha wisikhda ah iyo kuwa roobka. Qalab kastaana kuma habboona xaafad kasta. Ka hor intaanay King County go'aansan beebka cusub iyo taangi, kooxda mashruuca ayaa ka fikritay qalabka aadka ugu habboonaan doona.

Dhismaha Rainier Valley waa in ay ka shaqaysaa, goob aad u wayn halkaas oo dad badani ay ku nool yihiin kana shaqeeyaan. Si loo helo habka saxda ah si loogu adeego bulshadda, King County waxay ka jawaabtay su'aalahan:

- Qalabkee baa aad la isugu halayn karaa?
- Waa kuwee beebabka hore u jiray ee Degmadda iyo bamamka caawimada leh?
- Siddee baa qalabka sidda ugu suuragal san loo yarayn karaa?
- Qalab kee baa qiimaha yarayn kara?
- Siddee baa dhismaha cusub uu ugu habboonaan karaa xaafada?

Jawaabaha su'aalahani waxay ka caawiyeen King County in ay go'aansadaan ku darista beeb cusub, oo ay dib sameeyaan beebabkii hore ee gaboobay oo ay dhisaan taangi cusub. Qalabkaasi waxa ay u ogolaan doonaan King County in ay ka ilaaliyaan Webiga Duwamish biyaha wisikhda leh iyo biyaha roobka si badbaado leh oo la isku halayn karo. Dhisida dhismayaashani waxay keeni doonaan daahinta ugu yar ee jaararka iyo gawaadhida. Waxay kaloo u baahan doonaan tirada dhul ee ugu yar, siddaas

darteed xaafadu waxay ku dari kartaa meelo dheeraad ah oo laga shaqeeyo, wax laga iibsado oo lagu noolaado.

Intee in leeg bay qaadanaysaa in la dhiso?

Mashruucu waxa uu qaadanayaa laba sano in lagu dhiso waxaanu dhamaystirmayaa dayrta 2017.

Maxay u eekaan doontaa marka la dhameeyo?

Beebka S. Bayview St. waxa uu mari doonaa dhulka hoostiisa, siddaas darteed dhulku waxa uu u eekaan doonaa sidda uu hadda yahay.

Taangiga S. Hanford St. waxa uu siddoo kale mari doonaa dhulka hoostiisa. Qayb ka mida ah qalabka taanagigu leeyahay waxaa uu ooli doonaa dhulka korkiisa dusha dhisme hal dabaq ah. Waxaa jiri doona dayr ku wareegsan taangiga iyo dhismaha. Goobta dhir baalagu qurxin doonaa. Siddookale waxa jiri doonta horumarin jidka ku wareegsan goobta.

Miyay King County kiraysanaysaa dad si ay uga qayb qaataan dhismaha?

King County waxay kiraysan doontaa qandaraas layaal takhasus u leh si ay goobta u dhisaan. Si aad wax badan uga ogaato shaqooyinka King County, booqo:

http://www.kingcounty.gov/jobs.aspx

Siddee King County u go'aansanayaa cidda ay kiraysanayaan si ay u dhisaan dhismaha?

Qandaraas layaasha King County ay kiraysataa waxay uu u baahan doonaan in ay ka jawaabaan qandaraaska King Count ay ku qiimayn doonto hab tartan ah. Xogta qandaraaska waxa laga heli doonaa bogga kingcounty.gov.

Ka waran haddii dhismahu uu dhib igu yahay aniga?

King County iyo kooxdeeda mashaariicda waxay doonayaan xubnaha bulshadda in ay la wadaagaan fikradahooda iyo aragtiyahooda wax ku saabsan mashruuca. Waa kuu sax adigu in aad walaac ka qabto mashruuca. King County waxay la shaqayn doontaa bulshadda si aad ay ugu hubsato in dhisamayaasha cusubi ku habboon yihiin xaafada. Haddii aad ka walaacsantahay mashruuca, saamayntiisa adiga iyo bulshadda, fadlan na ogaysii.

Ka waran haddii dhisidda dhismahu uu dhib igu yahay?

King County waxa ay doonaysaa in ay noqoto jaar wanaagsan. Waxaan ognahay in ku noolaanta goob dhisme agteedu ay noqon karto mid niyad jab leh. Inta dhsimahu socdo, King County waxay yeelan doontaa shaqaale la heli karo oo mid mid ula shaqeeya xubnaha bulshadda wixii arin ah ee la xidhidha mashruuca. King County waxay wadaagi doontaa xogta ku saabsan mashruuca si caadi ah iimayl ahaan ama si toos ah albaabkaaga. Wac khadka mashruuca (206-205-9178) maalin ama habeen si ay ula falgalaan xubnaha kooxda mashruuca. Turjumaan waa laguu qaban karaa si bilaash ah.